

# SIDEEN KU HELI KARAA AMAAHDA CASHUURTA ILMAHA?

Miyaa adiga iyo caruurtaadu ku nooshihiin Mareykanka inta lagu jiro badi 2021 oo miyaa caruurtaadu leedahay lambaro soshial sakuyuurati ah?

**Maya**

Waxa laga yaabaa inaad ku haboonayn inaad hesho amaahda cashuurta ilmaha.

**Haa**

**Miyaad xaraysatay cashuurta sanadkii 2020?**

**Haa**

**Cunug ma kuu dhashay 2021?**

**Maya**

Haddii aad haysatid caruur kale oo ku haboon, waxaad toos u heli kartaa lacagaha, laga bilaabo Julaay 15aad, 2021.

Si aad macluumaad dheerad ah u hesho guji linkigan:  
<https://www.irs.gov/credits-deductions/advance-child-tax-credit-payments-in-2021>

**Haa**

Hambalyo! Isla marka uu ilmahaagu haysto lambarka damaanada bulshada waad isdiiwaangalin kartaa inaad bilawdo helitaanka lacagaha amaahda canshuuraha ee carruurta bishiiba.  
<https://www.irs.gov/credits-deductions/child-tax-credit-update-portal>

**Maya**

Hadii aanad xaraysan cashuurtaada, waxaad u baahandoontaa inay IRS ogaato in ilmahaagu ku haboonyahay iyagoo u maraya agabka isticmaalka galista:  
<https://www.irs.gov/credits-deductions/child-tax-credit-non-filer-sign-up-tool>

# Su'aalaha intabadan layswaydiyo

## **Hadii aad saxeexo Amaahda Daynta Ilmaha, waxay saamayn doontaa kabka kale ee dawlada (sida SSI, SNAP, TANF, ama WIC)?**

Maya. Helitaanka lacagbixinta Daynta Cashurta Ilmaha looma tixgalin karo dakhli qoysnaba. Sidaa darteed, ma badali doonto lacagta aad ku hesho kabka kale ee Federaalka. Kabkan Dawlada Fadaraalku bixiso waxa kujira caymiska shaqo la'aanta, Caymiska danyarta, SNAP, SSI, SSDI, TANF, WIC, Section 8, ama guryaha dadwaynaha.



**Caawimooyinka Guud waxa saamayn kara!** Haddii aad ku jirto Caawimada Guud, waad dooran kartaa lacag bixinta bil kasta sabab kasta ha noqotee. Si aad u doorato lacagaha billaha ah, ama aad iska diiwaangeliso, waxaad aadi kartaa Goobta Amaahda Canshuurta Ilmaha ee IRS. Haddii aad doorato inaad helin lacag bille ah, waxaad heli doontaa Gunnada Canshuuraha Ilmaha oo dhammaystiran oo ah sannadka dambe marka aad xarayso canshuur celintaada: <https://www.irs.gov/credits-deductions/child-tax-credit-update-portal>

## **Halkee ayay IRS kusoo diraysaa lacagtayda?**

IRS waxay kuu soo diri doontaa lacagahaaga iyagoo toos ugu shubi doona akoonka bangiga ee ay ku jira. Haddii aysan kuu haynin macluumaadka akoonka bangiga, hubin ayaa lagu soo diri doonaa.

## **Ka waran haddii aanan lahayn lambarada soshial sakuyuuratiga lakiin caruurtaaydu leedahay?**

Haddii aanad lahayn Lambarada Soshial Sakuyuuratiga, waxaad isticmaali kartaa ITIN (Lambarka Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha). Waxaad ka heli kartaa ITIN adoo buuxinaya Foomka W-7 ee IRS. Fiiri <https://www.irs.gov/individuals/how-do-i-apply-for-an-itin>

## **Immisa ayaan ka heli doonaa lacagaha Gunada Canshuurta Ilmaha?**

Inta badan qoysasku waxay heli doonaan xadi dhamaystiran: \$3,600 oo loogu talagalay ilmo kasta oo ka yar da'da 6 iyo \$3,000 ilmo kasta oo da'diisu tahay 6 illaa 17. Si ay dhaqso ugu helaan qoysasku, IRS waxay u diri doontaa qoysaska kalabadh nuskooda 2021 Gunada Canshuurta Ilmaha oo ah lacag bille ah oo ah \$300 cunug kasta oo da'diisu ka yar tahay 6 iyo \$250 ilmihii u dhexeeya 6 iyo 17 sano.

Xadigan wuu kukala duwanan karaa dakhliga. Dadkan waxay u qalmaan in la siiyo Gunada Cashuurta Ilmaha oo dhamaystiran.

- Lammaanayaasha isqaba ee dakhligoodu ka hooseeyo \$ 150,000
- Qoysaska leh waalid keli ah (sidoo kale loo yaqaan Madaxa Qoyska) oo leh dakhli ka yar \$112,500
- Qof kasta oo kale lehna dakhli kayar \$75,000

Dadkani waxay u qalmi doonaan ugu yaraan \$2,000 ee Gunada Canshuurta Carruurta, taas oo noqonaysa \$166 ilmihiba kasta bil kasta:

- Lammaanayaasha isqaba ee dakhligoodu ka hooseeyo \$400,000
- Qoysaska leh waalid keli ah (sidoo kale loo yaqaan Madaxa Qoyska) oo leh dakhli ka yar \$200.000
- Qofkasta oo dakhligiisu ka hooseeyo \$200,000

Qoysaska xitaa dakhligoodu sarreeyo waxaa laga yaabaa inay helaan qaddar yar ama aan haba yaraatee wax deyn ah lahayn.

**Waxbadan ogow: [www.whitehouse.gov/child-tax-credit/](http://www.whitehouse.gov/child-tax-credit/)**

**Ma ubaahantahay caawimaad bixinta ama helitaanka daryeelka ilmaha ee Portland Maine? Waxbadan ka ogow halkan: [www.portlandofportunity.com/how-do-i-find-childcare](http://www.portlandofportunity.com/how-do-i-find-childcare)**